



Dayrta 2020: Qeyb Ka Mid ah Jadwalada Waxbarashada

Ogosto 26, 2020

Qoysaska Qaaliga ah ee PPS,

Habeen hore Madaxa Iskuulada Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS), Dr. Shawn Bird, wuxuu soo bandhigay dulmarka guud ee jadwalada waxbarashada sanad-dugsiyeedka 2020-21. Waxaad ka daawan kartaa Dr. Bird bandhigiisa uu u soo bandhigay Golaha Waxbarashada marka aad [gujiso halkani](#).

Waxa aan ku soo bandhignay shabakadayada qeybo ka mid jadwalada waxbarashada iyada loo kala saaray fasalo. Si aad u aragto jadwalada [Waxaad gujisaa halkan](#). Sidaas darteed, waa in aad fariin ka heshaa maamulaha iskuulka oo ku saabsan jadwalka ardaygaaga todobaadkani. Jadwadani waxa ay bilaabmi doonaan maalinta Isniinta, Sebtember 14keeda. Xusuusinta ah labada todobaad ee ugu horeeya iskuulka ee (Sebtember 2 ilaa 11keeda) waxa la socoda jadwalka "Soft start" kaasi oo ka heli karto marka [gujiso halkan](#).

Iyada oo waqtigani yahay mid runtii aan hore inoo soo marin oo wata caqabadihiisa, haddana waxaan ku faraxsanahay in aan aragno ardaydayada todobaadka soo socda, iyada oo aan ku rajoweynahay in waqti dhow aan ku soo dhaweyn doono dhismayaasha iskuulada iyaga oo nabadqaba. Aad iyo aad baad ugu mahadsan tihiiin dulqaadkiina inta aan ka soo shaqeyneynay sidii kor loogu qaadi lahaa waayo-aragnimada waxbarashada online-ka ah ee guryaha ay ku qaadanayaan arday kasta oo ka mid ah ardayda wax ka barata iskuulada Dugsiyada Dadweynaha Portland.